

Barnaamijka Taageerada Waxbarashada Degdega ah ee COVID

Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Wax ku saabsan Barnaamijka Taageerada Waxbarashada Degdega ah ee COVID

Barnaamijka Taageerada Waxbarashada Degdega ah ee COVID (COVID Intensive Learning Support Program (CILSP)) wuxuu siiyaa wax barida koox yar oo loogu talagalay ardeyda u baahan badi dhammaan dugsiyada khaaska ah, dugsiga sare iyo dugsiga hoose dhexe ee NSW.

Barnaamijku waa isutag tamar isugeyn oo u dhaxeeya Wasaaradda Waxbarashada NSW, Dugsiyada Katooliga NSW iyo Ururka Dugsiyada Madaxa bannaan ee NSW.

Barnaamijkan waxaa loo bilaabay si loo caawiyo ardeyda waxbarashadoodu waxyeeloowday oo ay wakhtiyoo la dheeriyyey waxbarasho guriga ku qaadanayeen sababtuna ahayd ugu weyn faafida COVID-19. Barnaamijku wuxuu xoog saaraa tiro iyo wax qoris iyo akhris barashada.

Dugsi kastaa wuxuu sameystaa barnaamij ay leeyihii oo ku saleysan baahida ardeydooda oo ay maareeyaan barnaamijka iyagoo shaqaaleynaya macalimiin si takhasus leh u tababaray iyo barayaasha kale sida macalimiinta jaamacadda iyo kuwa dugsiga ka hore (preschool).

Casharadaan kooxda yar waxaa la qaban karaa ka hor ama ka dib ama inta lagu jiro saacadaha dugsiga.

Sida barnaamijku u shaqeeyo

Iyadoo la isticmaalayo barnaamijka taageerada waxbarashada degdega ah ee COVID, dugsiyada waxaa la siiyaa maalgelin oo ay ku shaqaaleeyaan barayaal dheeraad ah oo ay siiyaan kooxo kooxo yar oo ardeyda ah.

Iyadoo lala midoobayo maamulaha dugsiga oo isticmaalaya qiimeyno kala duwan, macalimka fasalka ayaa go'aaminaya carruurta ka faa'iideysanaysa wax barida kooxdan yar.

Ku darida ilmo kasta barnaamijka ayaa ka dib lagala hadlaa waalidiintooda ama xannaaneeyayaashooda ka dibna waxaa la sameeyaa qorshaha waxbarida. Ilmaha horumarkiisa ayaa si joogta ah loo jeegareeyaa waxaana la adkeeyaa xiriirka waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha.

Qayaha ugu muhiimsan barnaamjka

- Ardeyda dhigata dugsi kasta oo ku yaal NSW waxaa taageeraya barnaamijka. Sannadkii 2021 wadarta ardeyda ee la taageeray waa 265,000.
- Kooxda yar ee waxbarasho waxaa bixiya barayaasha dheeraadka ah – oo ay ku jiraan macalimiin wakhti wakhti ah iyo kuwo ku meel gaar ah, macalimiin shaqada ka fadhiistay, iyo ardey macalimnimada baraneysa. Macalimiinta dheeraadka ah waxay si dhow ula shaqeeyaan macalimiinta fasalka si ay u hubiyaan in waxbaridu ay wajahdo baahida ardeyda.

- Waxbarashadu waxay xoogga saareysaa tiro iyo akhris iyo qoris barashada.
- Koox ah barayaal takhasus leh iyo maamulayaashu waxay taageeraan oo hagaan dugsiyadu inay dhaqangeliyaan barnaamijka.
- Waxbarida kooxda yari waxay ku lug leedahay taageerada waxbarashada iyo waxbarida dheeraadka ah ee kooxaha 2-5 ardey. Ardeyda waxaa wax loogu dhigaa si joogta ah wakhtiguna waa mid hore loo go'aamiyey oo qasadku yahay in la xoojiyo tilmaamaha fasalka.

Barnaamijka Taageerada Waxbarashada Degdega ah ee COVID iyo ilmahaaga

Macalimka ilmahaaga ayaa kula soo xiriiri doona, haddii aad u aragtid inuu faa'iido siineynayo ilmahaaga.

Haddii aad dooneysid wax badan oo ku saabsan barnaamijka booqo Bogga weysaytka Barnaamijka Taageerada Waxbarashada Degdega ah ee COVID ([COVID Intensive Learning Support Program webpage](#)). Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, kala hadal barnaamijka macalimka ilmahaaga.

Adeegga Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya weydiintaada fadlan ka wac Adeegga Turjubaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjubaan luuqadaada. U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka aad dooneysid inaad wacdid, xiriiriyaha ayaa khadka soo gelin doona turjubaan kaa caawiya wadahadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.